

TISK la fududeeyay ayaa degmooyinka lagu soo rogayaa

Dawladdu waxay go'aamisay laga billaabo 27-ka sibteembar in degmooyinka lagu soo rogo TISK la fududeeyay. Marka la galo "Maalin caadi ah oo heegan sare leh", TISK la fududeeyay ayaa sii jiri doona muddo kala guur ah oo ilaa afar toddobaad ah.

- Waxaa sii badanaya dadka qaatay tallaal buuxa, cudurkiina wuu sii yaraanayaa. Laakiin weli in muddo ah ayaa waxaa loo sii baahan doonaa tijaaba-qaadis, gooni-u-bixid, raadraacidda cudurka iyo karantiil (TISK) aan badnayn. Sidaas darteed laga billaabo 27-ka sibteembar waxaan degmooyinka ku soo rogaynaa TISK la fududeeyay, ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka.

TISK la fududeeyay wuxuu keenayaa in ay yaraadaan dadka karantiilka gelaya iyo in degmooyinku yareeyaan hawlaha raadraacidda cudurka. Marka loo gudbo "Maalin caadi ah oo heegan sare leh" waxay dawladdu qorshaynaysaa in TISK la fududeeyay la sii wado muddo kala guur ah oo ilaa afar toddobaad ah.

[2-dii sibteembar ayaa la ogaaday](#) in dawladdu qorshaynayso in ay soo rogto istaraatiijiyad TISK oo la fududeeyay marka ay degmooyinka taas diyaar u noqdaan. Wadahadal wanaagsan ayaa degmooyinka lagala yeeshay waxa loola jeedo iyo goorta la soo rogayo.

Wararka kale ee koroonaha

Carruurta ka yar 16 sano oo laga dhaafayo waajibka diiwaangelinta soo gelidda waddanka

Xeer-hoosaadka covid-19 ayaa wax laga beddelayaa oo carruurta ka yar 16 sano ayaa laga dhaafayaa waajibka diiwaangelinta ee diiwaanka soo gelidda waddanka (IRRS). Wax-ka-beddeliddu waxay dhaqangelaysaa saqda dhexe habeynka sabtidu soo gelayso ee 18.09.21.

Tallaalista badmareennada ajnebiga ah

Farqi weyn baa u dhexeeya xaaladda tallaalka ee badmareennada ajnebiga ah. Badmareenno badan ayaa muddo dheer saaran markab/doon oo aan helin fursad ay tallaalka uga qaataan waddankoodi. Sidaas darteed ayay waxay dawladdu go'aamisay in shirkadaha maraakiibta tallaalka lacag la'aan lagu siiyo si loo tallaalo badmareennada ku soo xirta dekedaha Norway. Taas oo waafaqsan sidii ay FHI ku talisay. Shirkadaha maraakiibtu ayagaa ka mas'uul ah maammulka tallaalista. Degmooyinka doonayana tallaalka way u fidin karaan badmareennada.

Sharraxaadda TISK

TISK waxaa loola jeedaa tijaabo-qaadis, gooni-u-bixid, raadraacidda cudurka iyo karantiil. TISK waxay ahayd tillaabo lafdhabar u ah xakamayntii cudurka safmarka ah.

TISK waxay ka kooban tahay saddex heer:

TISK caadi ah waa mid qof kasta oo cudurka laga helo ay degmadu raadraacayso dadkii u dhowaaday qofka cudurka laga helay, oo dadka u dhowaaday la karantiilayo lagana codsanayo in ay tijaabo iska qaadaan – oo ay gooni u baxaan haddii cudurka laga helo.

TISK la sii xoojiyay waxaa la isticmaalaa marka ay xaaladda faafidda cudurku halista tahay oo qaadista tijaabooyinka ayaa la badiyaa, waxaana lagu dadaalaa in karantiilka iyo gooni u bixidda labadaba si fiican loo fuliyo.

TISK la fududeeyay oo la soo rogayo 27.09, waxaa la badin doonaa in dadku ayagu tijaabada iska qaadaan, waxaa yaraan doona dadka karantiilka gelaya – degmooyinkuna waxay raadraaca cudurka ku ekeyn doonaan dadka haliska ugu badan ugu jira in ay cudurka qaadaan.